Ontario

WAR SAXAAFADEED

Miisaaniyadda Ontario • 2014

Wasaaradda Maaliyadda

Dhiska Ontario Maanta ee Ka Iftiinka iyo Adkaan Badnaan Doonta Berrito

Miisaaniyadda 2014 ee Ontario Ayaa Horay Ugu Dhaqaaqaysa Qorshe Lagu Abuurayo Shaqooyin oo Dhaqaalaha Lagu Kobcinayo, oo Laguna Dhisayo Tareen Magaalo iyo Kaabayaal Casri Ah, Lagana Caawiyo Reer Ontario Hawlgabkooda, Iyada oo islama-markaa la Dheellitirayo Miisaaniyadda illaa 2017–18

WARARKA Julaay 14, 2014

Ontario ayaa horay ugu dhaqaaqaysa qorshaheeda ay ku dhisayso fursadda iyo xasilloonida maanta iyo berri. Miisaaniyadda Ontario ee 2014, ee u soo bandhigay maanta Wasiirka Maaliyadda (Minister of Finance) Charles Sousa, ayaa si dhakhso leh talaabo ugu qaadaysa sidii loo abuuri lahaa shaqooyin iyada oo la maalgashado shaqaale xirfad sare leh, oo la dhiso shabakado kaabayaal iyo gaadiid casri ah, lana taageero jawi meherad firfircoon oo cusub.

Miisaaniyadda ayaa sidoo kale talaabooyin u qaadaysa sidii loo dhisi lahaa xasilin hawlgab ay shaqaaluhu u qalmaan, iyada oo ah dadaal kacan-siinaysa koritaanka muddada-dheer ee dhaqaalaha. Dawladda ayaa kuu sii wadi doonta u maaraynta kharashaynta si xilkasnimo leh iyo baabi'inta difisidka illaa2017–18. Sida lagu soo bandhigay Miisaaniyadda 2014, si ay u gaadho bartilmaameedyada maaliyadeed isla markaa iyada oo u abuurayasa fursado iyo xasillooni dheeraad ah dadka ku nool deegaan kasta, dawladda ayaa u maamuli doonta kharash garaynta si taxadar leh isla markaa iyada samaysa maalgalin xeeladaysan oo tiirsanaan doona faa'iidooyinka tartan ee dadka iyo ganacsiyada reer Ontario.

Ku Tiirsanaanta Hibada iyo Xirfadaha Dadka

In kasta oo ay jirto jawi dhaqaale caalami oo adagi, Ontario ayaa ku sii wadda soo jiidashada maalgashiga abuurya shaqooyinka, oo korinta dhaqaalaha, oo u kala bixinya fursadaha loogu talagalay shaqaalaha maanta iyo berritaba. Xoogga-shaqaale ee Ontario ee hibada leh ayaa tayada ugu weyn ee soo jiidanaysa maalgashiga oo taageeraysa kobaca dhaqaalaha. Misaaniyadda ayaa ku tiirsanaan doona xoogga dadka Ontario iyada oo:

- Dhammaystirta soo-bandhigga Dugsi Barbaarinta Maalinta Buuxda (Full-Day Kindergarten) deyrtan iyada oo la maalgashado casriyaynta iyo dejinta daryeelka ubadka, si u ilmo kasta oo reer Ontario ahi uu helo bilowga nolosha ugu fiican ee suurtagalka ah.
- Maalgalgashiga farsamada fasalka lagu hubinayo inay da'yarta waxbartayaasha ahi ay u qalabaysnaadaan dhaqaalaha qarniga 21aad.

- Bixista deeqda ka Naaquska 30% Duruusta Ontario (30% Off Ontario Tuition grant) sidii loo hubin lahaa inay 260,000 oo dad da'yari ay awood ugu yeeshaan inay helaan digrii ama diblooma u horseedi doonta fursado intii ka badan.
- La fidiyo Xeeladda Shaqada Dhallinta Ontario (Ontario Youth Jobs Strategy) si loo siiyo dhallin intii ka badan fursad cagta hore ay kula galaan suuqa shaqada. Iyada qayb ka mid ah xeeladdan, ayay Fuunddada Shaqada Dhallinta (Youth Employment Fund) horayba uga caawisay 16,500 dhallinyaro inay helaan waayo-aragnimo shaqo iyo inay helaan shaqooyin illaa Sebtember 2013.

Dhisidda Shabakado Kaabayaal Iyo Gaadiid Casri Ah

Kaabayaasha dadweynaha Ontario —waddooyinka, buundooyinka, nidaamyada tareen ee magaalo, isbitaallada, iyo dugsiyadeena ayaa ka caawiya gobolku inuu noqdo meelaha ugu fiican ee lagu noolaado, laga shaqaysto, lna maalgashato adduunka. Si loo hormariyo faa 'iidada kaabayaasha Ontario, ayay Miisaaniyadda 2014 ku maalgalinaysaa $130 bilyan kaabayaasha illaa 10ka-sano ee soo socoda. Maalgashigan ayaa isla markaaba abuuri doona shaqooyin, oo horumarin doona wax soo-saarka taageeri doona shaqooyinka iyo koritaanka berrito. Waxa ka mid ah:

- Fuundooyin cusub oo loogu talagalay oo ku dhawaad $29 bilyan diyaar uga dhigi doonta illaa 10ka-sano ee soo socoda si loo dhiso shabakad is gaarsiin gaadiid mideysan lagana helo dhammaan gobolka oo idil iyada la maalgaliyo waddooyin-weynaha, taraansitka dadweynaha, waddooyinka, buundooyinkaba. Fuundooyinka ayaa si cadaalad oo hufan loogu qaybin doona tirada dadka, si ay Toronto Weynta iyo Agagaaraha Hamilton (GTHA) u heli doonaan $15 bilyan oo deegaannada kale ee Ontario u heli doonaan ku dhawaad $14 bilyan.
- U qoondayn $1 bilyan sidii looga abuuri lahaa kaabayaal xeelado gaadiid goobaha Ring of Fire oo laga faa'iideysto Kobaca dhaqaalaha Woqooyiga iyo shaqooyinka suutagalka ah.
- Maalgashi in ka badan $11 bilyan oo ah casriyaynta dugsiyada hoose iyo kuwa sareba illaa 10ka sano ee soo socda.
- In ka badan $11.4 bilyan mashaariicda waawayn ee ballaarinta isbitaalka iyo dib-u dhiska illaa 10ka-sano ee soo socota ah.
- Xarumo cusub oo tacliin sare oo lagu hubinayo inay jiraan boosas badan oo laga kulliyadda iyo jaamacadda ku yaal Ontario maadaama ay jiraan dhallinyaro han iyo hibaba leh.

Abuurka Jawi meheradeed Taagero iyo firfircooni leh.

Dhaqaalaha Ontario ee noocyada kala duwan leh ayay taageeraan kaabayaasha u kala wada dadka iyo bucshiradaha si wax ku ool leh, iyo xoog-shaqaale xirfad sare leh oo meheradaha korayaa ay raadsadaan, iyo saami cashuur shirkadeed baratan iyo sahamis caalami ah leh. Si ay wax ugu sii biirso xoogga jawiga meheradda Ontario ee firfircoonida iyo casnimada leh, Miisaaniyadda 2014 ayaa maalgashi ku samaynaysa iskaashi xeeladeed soo saara faa'iido dhaqaale waaritaan u leh meheradaha, beelaha iyo dadkaba. Waxa ka mid ah:

- Ku nuuxnuuxsi iskaashiyada maxalliga iyo caalamiga ah, oo ay ka midka yihiin ergooyinka ganacsi ee adduunyada, sidii loo kordhin lahaa oo loo siijadan lahaa maalgashiyo cusub.
- Dadaal badan oo loo iskaashiyada xeeladaha iyo shaqo-abuurka lala yeesho meheradda, oo ay taageerto Fuundo Shaqooyin iyo Barwaaqo (Jobs and Prosperity Fund) oo 10-sano iyo $ 2.5 bilyan ah. Iyada oo la adeegsado fuundadan, ayay shirkadihii horay u jiray iyo kuwa cusubba ay ku guuleysan doonaan waxa hadda noqday u baratan maalgashiyo caalami ah, oo beelo kasta oo deegaanka ka jira yaa ka faa'iideysan doona.

Abuurista Hawlgabino Xasilloon

Gobolka ayaa abuuri doonta Qorshaha Benshinka Hawlgabka Shaqaalaha Ontario (Ontario Retirement Pension Plan) looga caawiyo qoysaska shaqeeya inay samaystaan hawlgab sidii hore ka xasilan. Marka lagu daro Qorshaha Benshinka Kanada (Canada Pension Plan) CPP, waxay ka caawin doontaa in la helo halwgabka raaxada leh ay u mudan yihiin. Qorshaha Beshinka Hawlgabka Shaqaalaha Ontario (Ontario Retirement Pension Plan) ayaa:

- Bixin doonta dakhli soo hoyad la filan karo, loona xisaabiyay sicir bararka, oo la bixin doono cimiriga inta lagu jiro hawlgabka.
- Inay waajib u noqoto dadka reer Ontario ee ka badan 3da milyan ee aan lahayn qorshaha hawlgabka shaqada oo waxay uga baahan doonta wax ku biirin cadaalad iyo la mid ah shaqaalaha iyo loo-shaqeeyeyaashaba.
- In lagu shaqeeyo ka madax-bannaanaan dowlad, iyada oo ay u weheliso hirgalin u horseed u yahay Michael Nobrega oo ah madaxii hore ee OMERS.
- Inay Ontario u soo noqoto faa'iidooyin dhaqaale muddo-dheer ah marka lacag bixintu ka caawiso dadku inay lahaadaan heerka noloshooda ee hawlgabka oo ay ku sii wataan wax kharashaynta.
- In la soo saaro iyada oo lala tashado khubaraa benshin, gobollada, meheradaha iyo ururrada shaqada, sidii loo hubin lahaa in la maqlo aragtiyo bada oo aad u kala duwan.

Abuuritaanka Fursadaha iyo Ontario Cadaalad ah

Dowladda ayaa fahamsan inay guusha Ontario ku tiirsan tahay guusha dadka oo idil. Miisaaniyadda 2014 ayaa dhista Ontario cadaalad ah oo ku taageerta koritaanka dhaqaalaha tallaabooyin ay ka mid yihiin:

- In lagu sii wado wax ka beddelka nidaamka kaalmada bulshada, taas oo horumarin doonta taageerooyinka dakhliga oo yarayn doonta caqabadaha horyaal galitaanka shaqaalanimada.
- In la soo jeediyo in lagu xiro mushqaayadaha ugu yaraantasicir-bararka si wax looga taro hubinta shaqaalaha oo hela mushqaayad waxatar leh, kaddib marka sare loogu qaado illaa $11.00 saacaddiiba laga bilaabo Juun 1, 2014.
- Soo jeedinta qiimaha Ku-Dallaca Hawlgabka Deynta (Debt Retirement Charge) biilasha korontada ee isticmaalaha goobaha la deggan yahay kaddib Disember 31, 2015, si loogu keydiyo saami-bixinta caadiga goobaha la deggan yahay qiyaastiina ah $70 halkii sanaba.
- Iyada oo laga sii wanaajiyo

- Bixinta

-

U Tabaabushaha Deellitirka Maaliyadeed

Dawladda ayaa baabi'in doonta difisidka illaa 2017 18. Miisaaniyadda 2014 ayaa tilmaamaysa jidka lagu maareeyo kharashayn xilkasnimo iyo maalgashi xeeladaysan u leh koritaanka cusub. Iyada oo taageero laga helo Madaxweynaha cusub ee Guddiga Keydka Maaliyadda, iyaga oo difaaci doona arrimo hufnaanta, howl-karnimada, la xisaabtankaba dhammaan dowladda ka jirta, Ontario ayaa la kulmi doonta bartilmaameedkeeda miisaaniyad dheellitiran oo loo dhaqaaqo dhinaca deyntii dhaqaale xumaanta kahor illaa heerarka GDP. Tallaabooyinka Miisaaniyadda 2014 waxa ka mid ah:

- In lagaga soo saaro qiime hantida gobolka, Guddi La-talin u hoogaaminayo Madaxweyne Koox shaqada ka fadhisanya iyo Sarkaalka ugu Sarreeya ee TD Bank Group oo ah Ed Clark.
- Ku sii wadka hoggaaminta barnaamij kharashaynta dowlad ugu fudud dalka oo idil.
- Ku sii wadka maaraynta kharashaynta si natiijadeedu noqoto kharashka barnaamijku noqodo in ka hooseya sidii la saadaaliyay midkood kasta shantii sano ee la soo dhaafay.
- In xeelad ahaan la maalgashado dadka, kaabayaasha iyo iskaashiga meheradhasi loo abuuro koritaanka maanta iyo berrito.
- Soo jeedin ah in la kordhiyo cashuurta dakhliga shakhsiga ee dadka boqolkiiba laba kuwa ugu sarreeya ah ee cashuurta ka buuxiya Ontario, iyada oo boqolkiiba 98ka kale ee cashuurta xereeyaa ayna arki doonin wax isbeddel ah.

Dhisidda Kanada ee Sidi Hore Ka Xooggan

Maadaama ay lacag saafi ah ay ku biirso Israaca Dowladeed (confederation), Ontario ayaa ka fileysa dowladda sare inay si cadaalad miisaaniyadeed ah ula dhaqanto. Laakiin ku soo wareejinta weyn ee dowladda sare Ontario sannadkan ayaa ah $ 641 milyan in ka yar, taas oo ay khubarada madaxabannaan iyo xitaa sarkaalka miisaaniyadda barlamaanka Kanada ayaa u gartay inay tahay cadaalad-darro. Ontario ayaa ku sii wadi doonta ku adkeysiga ku soo wareejin maaliyadeed cadaalad ah oo ka timaad dawladda sare iyo raadsiga iskaashiga dowladda sare lagala yeesho arrimaha danta qaranka iyo gobolba. Miisaaniyadda Ontario ee 2014 ayaa qaadaysa tallaabooyin dan ugu jiraan labadaba qaranka iyo gobolkaba, kana mid yihiin:

- Ka faa'iideysiga kheyraadka suurtagalka ah ee ku jira Ring of Fire.
- Wanaajinta iyo xasilinta keydsiga hawgabka reer Ontario
- Dhisidda waddooyinka iyo nidaamka gaadiid dadweyne dhaqaalaheenu u baahan yihiin inuu soo koro.

Miisaaniyada 2014 Ontario ayaa soo-bandhigaysa qorshe dhammaystiran oo loogu talagalay Ontario itaal badan, shaqooyin ka badan intii horena leh, fursad dheeraad ah iyo mustaqbal ka badan oo la isku hallayn karana leh. Waxay kor ugu dhisi doontaa Ontario fursado hadda la helo iyo xasiloonaan mustaqbalkeena ah.

XIGASHO

" Miisaaniyaddayada ayaa siinaysa qorshe loogu talagalay reer Ontario oo mustaqbal ka fiican oo ka itaal badanleh. Waxay u abuuraysaa fursad iyo xasillooni ka badan sidii hore dadka ku nool meel kasta oo ka tirsan gobolka. Reer Ontario ayaa na ammaanaystay annaga iyo qorshahayagaba oo maanta ayaan bilaabaynaa inaan horay u dhaqaaqno. Waxaan maalgashan doonaa tababbarka waxbarashada iyo xirfadaha lagama maarmaan u ah koritaanka cusub. Waxaan dhisi doonaa gaadiid dadweyne si loo yareeyo ceegaagga taraafikada oo aan ku xidhi doonaa beelaha jidad iyo waddooyin cusub. Waxaan iskaashan doonaa meheradaha sidii loo abuuro shaqooyin lacag fiican bixiya oo waxtar leh, iyo in la bixiyo xasilloonaan lacageed xitaa ka sii badan oo loogu talago hawlgayada mustaqbalka.

–18."

— Charles Sousa, Wasiirka Maaliyadda (Minister of Finance)

XAQIIQOOYIN DHAKHSO LEH

-

Illaa intii

- Tallaabada geeddi socodka abuuritaanka shaqo ee Ontario tan iyo Juun 2009 ayaa ah mid ka itaal badan marka loo eego inta ugu badan ee ah dhaqaalayaasha horumaray, kana mid tahay Maraykanku, oo celcelis ahaan dalalka xubnata ka ah Ururka Iskaashiga Dhaqaalaha iyo Horumarinta (Organisation for Economic Co-operation and Development), iyo inta kale ee Kanada oo la isku daraba.

- Ontario ayaa leh ta ugu hooseysa ee barnaamij kharashaynta qofkii-kasta ah marka loo eego gobollada Kanada, oo ka qaadda lacagta ugu hooseysa qofkiiba, oo ay ku jiraan kharashaynta ka timaad dowladda sare, isla markaa iyada oo bixisa adeegyo dadweyne oo tayo sare leh oo taageerta fayoqabka reer Ontario.
- Sida laga soo xigtay warbixinta Mowat Centre, dadka reer Ontario ayaa ku biiriyiya $11 bilyan oo dheeraad ah dowladda federaalka marka loo eego intay u heshay u soo celin 2009-10 (sannadkii ugu dambeeyay ee xogta laga hayo). Taasi waxay u dhigan tahay $850 qofkii reer Ontario ahba.
- Iyada oo qayb ka mid ah u heellanaanteeda sidii doollar kastaa u anfac u yeelan lahaa, ayay haddaba dawladdu ku kacaysaa in ka badan boqolkiiba 80 talooyinka Guddiga Waxa Ka-Beddelka Adeegyada Dadweynaha ee Ontario (Warbixinta Drummond) (Commission on the Reform of Ontario's Public Services (the Drummond Report).
- Dawladda ayaa horay ugu siii tallabsanaysa sidii ay uga soo saari lahyd qiime dulsaar saamiyadeeda General Motors iyo milkiyadaha qaarkood ee ah hanti-maguurtada ah ee gobolku leeyahay si dib loogu maalgashado kaabayaasha dadweynaha, oo aasaastayna Gole La Talin Hanti Dowladeed (Advisory Council on Government Assets) sidii loo eegi lahaa u kala doorbidka fursadaha hanti-goboleedka muhiimka ah, iyada oo mudnaanta hore la siiyo u soo saar macaash iyo dakhliyo reer Ontario.
- Si loocaawiso fuundada gaadiidka daweynaha iyo kaabayaasha gaadiidka, dawladda aya soo jeedinaysa in la kordhiyo canshuurta la qaado shidaalka duullimaadyada. Canshuuraha ayaa ku kordhi doona hal boqollay litir-kiiba markay tahay Sebtember 1, 2014 iyo hal boqollay litir-kiiba sannad walba markay tahay Abriil 1 laga bilaabo 2015, 2016 iyo 2017.
- Dowladda ayaa ku wadda inay ka qaaddo ficil adag oo laakiin cadaalad ah si ay u maarayso kharashyada magdhowga iyo dheefaha qaybta dadweynaha.

WAXYAABO DHEERAAD AH OGOW

Akhriso Misaaniyadda 2014 ee Ontario

Akhriso Qudbadda Misaaniyadda

Akhriso inta ugu muhiimsan ee Misaaniyadda 2014 ee Ontario.

Akhriso sooyaalka macluumaadka ku saabsan Misaaniyadda 2014 ee Ontario:

- Abuuritaanka Jawi iyo Shago Meheradeed oo Firfircoon
- Dhisidda Kaabayaal Casri ah
- Bulsho Cadaalad ah
- Tamar Nadiif ah, Laguna Kalsoon Yahay oo la awoodi karo, oo loogu talagalay Reer Ontario
- Aragtida Dhaqaale iyo Qorshaha Miisaaniyadeed ee Ontario
- Fuundo ka yaraynta reer Ontario ee dowladda sare
- Xoojinta Xasiloonaanta hawlgabka reer Ontario.
- Faraqa u dhexeeya Mashruuca Xeerka Misaaniyadda la soo bandhigay markay ahayd Mey 1, 2014 iyo Mashruuca Xeerka Miisaaniyadda maanta.

LOOGU TALAGALAY WARSIGA WARBAAHINTA KALIYA
Susie Heath, Xafiiska wasiirka (Minister's Office), 416-325-3645
Scott Blodgett, Wasaaradda Maaliyadda (Ministry of Finance), 416-325-0324

MARKAY TAHAY WEYDDIIMAHA DADWEYNAHA SOO WAC:
1-800-337-7222
TTY : 1-800-263-7776